



## KULANKA MADASHA WADATASHIGA IYO ISKAASHIGA EE WASARADDA DEEGAANKA IYO ISBEDDELKA CIMILADA EE HEER FEDERAAL IYO DOWLAD GOBOLEED

### Warmurtiyeed

**Muqdisho, 10 Febraayo 2026** waxaa qabsoomay kulanka heer Wasiiro ee Madasha Isku-duwidda (wadatashiga iyo iskaashiga) ee MOECC–FMS, kulankaas oo uu shir-guddoominayay Wasiirudawlaha Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada (MOECC) ee Dowladda Federaalka Soomaaliya Mudane Axmed Cumar. Kulanka waxaa ka soo qayb galay Wasiirada Dowlad-goboleedyada Galmudug, Hirshabelle, Koonfur Galbeed, iyo Waqooyi Bari.

Kulanka waxaa dib loogu eegay natiijooyinkii ka soo baxay kulankii 7 February 2026 ee Agaasimayaasha Guud. Wasiiradu waxa ay falanqeeyeen natiijada iyo talooyinka farsamo ee ay isku raaceen Agaasimayaasha Guud. Qodobada ka soo baxay kulanka Agaasimayaasha Guud ee hoos ku xusan ayaa loo gudbiyay kulanka Wasiirada, Falanqayn ka dib, Wasiiradu waxa ay ansixiyeen qodobada lagu heshiiyay ee ka soo baxay kulanka Agaasimayaasha Guud.

#### 1. **Kulamada Madasha iyo Hirgelinta Go'aamada ka soo baxa Madasha**

In kulamada Madasha Agaasimayaasha Guud la joogteeyo oo kulamada la qabto 3 bilood hal mar. Sidoo kale in qodobada lagu heshiiyo la hirgeliyo si ay Madashu u noqoto mid wax ku ool ah;

#### 2. **Qaab-dhismeedka Wasaaradaha Deegaanka & Isbeddelka Cimilada**

In la mideeyo magacyada iyo qaab-dhismeedka Wasaaradaha Deegaanka ee heer federaal iyo heer dowlad goboleed iyadoo la raacayo qaab-dhismeedka Wasaaradda Deegaanka & Isbeddelka Cimilada ee uu saxiixa H.E. Hamze Abdi Barre, Ra'iisal Wasaaraha JFS kuna taariikhaysan 28/01/2026. Taasi waxa ay sahli wada shaqaynta labada heer dowladeed waxayna u fududayn sidii Waaxyaha Wasaaradaha ay u wada shaqayn la haayeen Waaxda dhigeeda ah;

#### 3. **Shuruucda iyo Siyaasadaha Deegaanka & Isbeddelka Cimilada**

Shuruucda iyo siyaasadaha ay qorayso ama dejinayso Wasaaradda Deegaanka & Isbeddelka Cimilada JFS waa in lagala tashadaa dowlad goboleedyada. Wadatashigu waxa uu suurtagalin in shuruucda iyo siyaasaduhu ay noqdaan kuwo ka turjumaya xaalada dalka iyo in si midaysan looga wada shaqeeyo hirgelintooda. Sidoo kale, wadatashiyadu waxa ay

fududaynayaa in la is-waafajinno shuruucda iyo siyaasadaha deegaanka iyo isbeddelka cimilada ee heer federaal iyo dowlad goboleed.

**4. Xoojinta Awooddaha Wasaaradaha**

In la dhisno awooddaha Wasaaradaha deegaanka ee heer federaal iyo heer dowlad goboleed iyadoo la hirgelinayo barnaamijyo tababaro ah si loo xoojiyo ilaalinta deegaanka, maareynta kheyraadka dabiiciga ah iyo wax ka qabashada saameynta isbedelka cimilada. Waa in shirarka gudaha iyo kuwa dalka dibadiisa ah ay ka qayb galaan cida ku habboon loona qaybiyaa si siman;

**5. Xoojinta Waxbarashada & Wacyigelinta Deegaanka**

Waa in la xoojiyaa wacyigelinta arrimaha deegaanka & isbeddelka cimilada si kor loogu qaado wacyiga bulshada Soomaaliyeed. Waa in laga wada shaqeeyaa sidii manhajka waxbarashada loogu dari lahaa arrimaha deegaanka, horumarinta wacyigelinta bulshada, iyo taageeridda cilmi-baarista la xiriirta deegaanka iyo isbeddelka cimilada.

**6. Abaabulka Ilaha Dhaqaale**

Waa in la xoojiyo abaabulka iyo helintaanka dhaqaale wax looga qabto ilaalinta deegaanka iyo saamaynta isbeddelka cimilada. Waxa aan ka wada shaqayn doonaa curinta barnaamijyo iyo mashaariic waxtar u leh dadka Soomaaliyeed isla markaana waxaan is wadajir ah uga shaqayn doonaa helintaanka dhaqaale lagu fuliyo hawlahaas. Ilaha dhaqaale ee muhiimka ah waa miisaaniyadda dawlada, maalgelinta shirkadaha gaarka loo leeyahay, hay'adaha aan dawliga ahayn iyo taageerada caalamka.

**7. Xiriirka Caalamka**

Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada JFS ayaa ah hay'ada u qaabilsan isku dubaridka iyo xiriirka hay'adaha caalamiga ah ee deegaanka iyo isbeddelka cimilada. Wasaaraddaha Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada ee dawladda goboleedyadu waxa ay si siman u helayaan wixii fursado ah ee dalku uu ka helo caalamka iyadoo loo marayo wadatashi iyo iskaashi. Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada JFS waxa ay u fudaydini Wasaaradaha dawladda goboleedyada hawlaha kaga xiran hay'ada iyo dalalka dibeda ee ay u baahdaan ama soo codsadaan.

**8. Cabashooyinka dowlad-goboleedyada**

Cabasho ay qabaan dowlad goboleedyada ee ku aadan hay'adaha mashaariicda gacanta ku haya, waxa ay cabashada u soo qorayaan Wasaaradda Deegaanka & Isbeddelka Cimilada JFS si ay u xaliso.

**9. Iska warqabka Agaasimayaasha Guud iyo Wasiirada**

Xiirka iyo wadashaqaynta heer Wasiiro, waxaa ka xiriiraya Wasiirada. Arrimaha khuseeya Agaasimayaasha Guud waxaa ka xiriiraya Agaasimayaasha Guud iyadoo OG la siinayo Wasiirada.

**10. Waqooyi Bari**

Waxaa la isla qaatay in dowlad goboleedka Waqooyi Bari mudnaan la siiyo oo ay qayb ka noqoto mashaariicda cusub ee la qaabayn doono. Waxaa kale oo la isla qaatay in mashaariicda hada socda wixii macquul ah laga qayb galiyo dowlad goboleedka Waqooyi Bari.

**11. Xoojinta Iskaashiga Wasaaradaha**


Si ay Madashu u noqoto midho dhal, waxa la soo jeediyay in Wasaaradaha labada heer dowladeed ay yeeshaan guddi farsamo guddigaas oo ka shaqayn doona arrimaha farsamo ee Madasha warbixinna u gudbin doona Agaasimayaasha Guud. Waxaa la ay isla qaatay in


arrimaha deegaanka & isbeddelka cimilada ay yihiin arrimo u baahan in si wadajir ah looga shaqeeyo.


## **GUNAAANAD**


Kulanka Madashu waxa uu astaan u yahay hogaamin mideysan ee arrimaha deegaanka & isbeddelka cimilada ee Soomaaliya. Madashu waxa ay hormuud ka noqonaysaa wadajir & iskaashi Wasaaraddaha Deegaanka & Isbeddelka Cimilada ee heer federaal iyo heer dowlad goboleed. Wadajir ayaa wax looga qaban karaa saamaynta isbeddelka cimilada iyo dhibaatooyinka deegaanka. Waxaa naga go'aan in aan xoojino wada shaqaynta iyo iskaashiga si aynu u gudano waajibaadyada la noo igmada. Wasiiradu waxa ay iska waraysteen xaaladda aabaraha ee dalka ka jirta, waxayna soo jeedinayaa in si wada jir ah looga hawl galo sidii loogu gurman lahaa bulshada Soomaaliyeed ee ay abaaruhu saameeyeen.


**Wasiirada saxiixay:**

1. H.E. Axmed Cumar Maxamed   
Wasu-dowlaha Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada, Dowladda  
Federaalka Soomaaliya

2. H.E. Diini Cabdinuur Maxamed   
Wasiirka Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada, Koonfur Galbeed

3. H.E. Saciid Siyaad Shirwac Yuusuf   
Wasiirka Wasaaradda Deegaanka, Isbeddelka Cimilada & Horumarinta Reer  
Miyiga, Galmudug

4. H.E. Maxamuud Xuseen Yuussuf   
Wasiirka Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada, Hirshabelle

5. H.E. Saciid Maxamed Cabdiraxmaan   
Wasiirka Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada, Waqooyi Bari